Barnmorskemottagningar, Regionhälsan
Patientinformation: Järntillskott under graviditet översatt till somaliska
Datum: 2025-02-11

Xog loogu talo galey bukaanka

# Feero qaadanaya inta lagu jiro muddada uurka

Waxaa muhiim ah in la qaato feero inta aad uurka leedahay. In ay heer wanaagsan gaarsiisan tahay feerada dhiigga ku jirta, waxay u fiican tahay kobaca dhiigga.

Feerada oo yaraatana waxay sababtaa heema golobiinta oo dhacda ("Dhiiga oo dhaca", Hb oo hoos u dhaca) waxayna sababtaa daal. Muddada qofku uurka leeyahay waxaa kordha baahida maadada feerada sababtoo ah hooyada iyo ilmaha uurka ku jirba way u baahan yihiin. Sidaa darteed ayaa la kantoroolaa bilowga uurka, keyda feerada ee jirka ku jirta, markaas kadibna waxaa lala socdaa heerka dhiiga (Hb) si joogta ah inta qofku uurka leeyahay.

Markii keydkaaga feerada (s-ferritin) la kantarooley waxaa noo soo baxdey:

☐ In ay habboontahay inaad billawdo inaad 100 mg si maalinle ah uga qaadato dawada feerada.

☐ Waxaa habboon inaad billawdo inaad 100 mg si maalin dhaaf ilaa iyo seddaxdii maalinba hal mar ah uga qaadato dawada feerada.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

Mid ka mid ah dawooyinka soo socda ee aan u baahneyn inuu taqtar qoro ayaa qofka lagula taliyaa:

- Duroferon® (100 mg)
- Niferex® kapsel (100 mg)

Iska ilaali inaad isku qaadatid dawada feerada iyo cuntooyinka ka hortaga in jirkaaga qaato feerada, sida caanaha, kafeega, shaaha, jukulaatada,koonfalakiska, cuntada baalka ama dufta leh iyo sareenka aan sida fiican loo shiidin.

# Cilladaha dawadaan lagu yaqaan

Dhib dhanka caloosha iyo mindhicirrada ah ayey badanaa leedahay laakiin khatar ma ahan. Cilladahaas waxay noqon karaan saxarada oo ku jilicda ama ku adkaata, la labo iyo caloosha oo qasanta. Ciladahaas way ka ba'aan qof markuu mudo isticmaalo dawada.

Waxaa jira cuntooyin badan oo dhanka caafimaadka loogu talo galay oo maadada feerada leh oo la tijaabin karo hadii Duroferon® ama Niferex® ay kugu keenaan cilado badan. Cuntooyinkaas ka mid ma ahan dawooyinka qaymo dhimista leh, laakiin waxay noqon karaan kuwo wax dhib ah ku keenin mindhicirka sidaas darteed way u qalantaa in la tijaabiyo.

**Haddii ay adagtahay inaad qaadato qiyaas feero/bir oo sax ah, umulisada kala xiriir rugta qaabilaadda umulisooyinka si aad talo u hesho.**

# Ku socota qofka lagu daweeyo Levaxin® (Levotyroxin)

Ka fakar in dawada feerada aan la qaadan isla saacada aad qaadanaysid Levaxin®, maadaama feeradu ay yaraynayso in jirku qaato maadada

Levaxin tu ka samaysan tahay ee tyroxin. Hadii Levaxin® iyo dawada feerada aad wada qaadanaysid – u dhaxaysii ugu yaraan labo saacadood.